This VIS translation is out of date. When you give your patient this translation, also give them the up-to-date English version of it.
To get both, and to find out what was updated, go to www.immunize.org/vis

TALAALKA CUDURKA FURUQA

WAXA AAD U BAAHANTAHAY IN AAD OGAATID

1 Waa Maxay cudurka Furuqa?

Cudurka Fururqa waxa weye cudur halis ah oo dila ilaa (boqolkiiba soddon) 30% dadka ku dhaca cudurka.

Waxaa sabab u ah feyruuska lagu magacaabo **Variola**, kaa soo ku faafa shakhsi ilaa shakhsi ayagoo ka dhaxeeya xiriir aad isu-dhow.

Cudurka Furuqa waxaa kale oo sabab u ah:
- nabar yar-yar oo jirka ka soo yaaca oo aad u daran, kaa soo jirka kaga tagayo nabaro marka uu boqsado
- xumad aad u saraysa
- daal-daran
- madax-xanuun daran iyo dhabar-xanuun
- indho la'aan

Xaaladda ugu dambaysay ee dunida oo sida dabiiciga ah-la helay cudurka furuqa waxay ahad 1977dii.

2 Maxaa la isu-tallaalaya?

Tallaalka cudurka Furuqa wuxuu badbaadinaya dadka ka shaqeeya cudurka Furuqa ama shaybaarada ka shaqeeya waxa la xiriira feyruusyada.

Waxaa la aaminsan-yahay in argagxisada ama dowladaha cadowga ku ah Wadanka Maraykanka (United States) waxaa kaloo laga yaaba in ay haystaan feyruuska cudurka furuqa ayna u isticmaali karaan hubka nafleyda. Tallaalka cudurka Furuqa wuxuu badbaadinaya caafimaadka kooxaha daryeelka ka jawaabida, iyo kuwa ugu horeeya ee ku dhaca, cudurka furuqa. Kooxahan waxay aqoonsan doonaan dadka kale ee u baahan in laga tallaalo si ay u xukumaan cudurka in uu dilaaco, iyo asaasida isbitaalada yar-yar ee tallaalada bulshada.

Xilliga cudurka uu dilaaco ama xaaladda deg-dega, tallaalka cudurka furuqa wuxuu badbaadin karaa dadka hela feyruuska cudurka furuqa.

3 Tallaalka cudurka furuqa

Tallaalka cudurka Furuqa waxaa laga sameeyey feyruuska lagu magacaabo faaksiniya (**vaccinia**). Feyruuska faksiiniya (vaccinia) wuxuu u ek-yahay feyruuska cudurka furuqa, laakiin wuu ka dhib yar-yahay. Tallaalka faksiiniya (vaccinia) wuxuu dadka ka badbaadin karaa cudurka furuqa. Tallaalka ma ka koobna cudurka furuqa.

Helitaanka tallaalka *ka hor* inta cudurka uu ku helin wuxuu wax badan dadka ka badbaadin doona cudurka furuqa. Helitaanka tallaalka *3 maalmood gudahooda ka dib dhacitaanka cudurka* wuxuu ka hor-tagi karaa cudurka ama ugu yaraan wuxuu yareynaya xanuunka daran. Helitaanka tallaalka *isbuuc gudahiisa ka dib dhictaanka cudurka* weli wuxuu yareyn karaa xanuunka daran ee cudurka.

Badbaadinta qaadista cudurka waxay dhamaanaysaa 3 ilaa 5 sanadood, iyo ka badbaadinta cudurka daran iyo dhimashada waxay dhamaan kartaa 10 sanadood ama in ka badan.

4 Qofkee helaya tallaalka cudurka furuqa iyo goormaa uu helaya?

Isticmaalka Nidaamka xaalad aan-deg-deg ahayn (ma jiro cudur faafin)
- Shaqaalaha shaybaarka oo gacanta ku haya abuurista-jeermiska ama xayawaanada soo gaaray cudurka ama qaaday feyruuska faksiiniya ama feyruusyo la deris ah (sida, monkeypox, cowpox, variola).

- Caafimaadka bulshada, isbitaalka, iyo shaqaalaha kale, guud ahaan da'da 18-65 sanadood, kuwa soo laga yaabo in ay ka jawaabaan xaalada cudurka furuqa ama faafidda cudurka.

Isticmaalka Xaalada Deg-dega (Faafidda Cudurka Furuqa)
- Qof kasta oo ***si toos ugu dhacay feyruuska*** cudurka furuqa wuxuu helaya hal dhibic oo tallaal ah sida ugu dhasaha badan ee suura-galka ah ka dib marka uu ku dhaco cudurka.
- Qof kasta ***oo ku jira khatarta helitaanka feyruuska*** cudurka furuqa wuxuu u baahnaan karaa in uu helo hal dhibic oo tallaal ah marka khatarta cudurka soo dhacdo ama la fahmo.

Dadka la tallaalay waxay u baahnaan karaan in dib-loo tallaalo 3-10 sanadood ka dib, hadba waxay ku xiran tahay khatarta.

5 Tallaalka ka-dib

Waxa ka aad eegtaa Dheeriga A iyo B waxii warbixin dheeraad ah

Ficil-celinta Laga Filayo
Nabar biyo galaan ayaa ka samaysmaya goobta tallaalka. Goor dambena waxaa noqonaya xinjir qalalan ee nabar ku dul samaysanta. Ugu damabystiina nabarka xinjirta ah wuu hoobanaya, wuxuuna ugu tagaya nabar xagtin leh.

Waxaa kale oo la kulmaysaa qanjirka jilicsan oo barara wuxuuna dhamaanaya 2-4 isbuuc ka-dib nabarada biyo galaanka ay boqsadaan, xoqida goobta la tallaalay, daal, qano kulu, madax xanuun, ama muruq xanuun.

Daryeelida Goobta La Tallaalay
Ilaa uu nabarka xinjirta ah ka hoobto, waxa aad feyruuska faksiiniya (vaccinia) ku faafin kartaa dadka kale ama qeybaha kale ee jirkaaga ka tirsan.
Si loogu hortago arintan, waxa aad meelaha nabarada ku yaalaan ku daboosha faasha dabacsan. (Marka goobta shaqada, shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxay u baahnaan doonaan cabiraadyo dheeraad ah, sida dharka khafiifka ee si adag u daboolin meesha nabarka leh.)

Si loo baahdo u bedel faashada (1-3 maalmood kastaba haddii keliya aad isticmaalaysid faashada nabarada, iyo 3-5 maalmood kastaba marka aad isticmaalaysid faashada

Sii socda...

khafiifka ah). Waxa aad ku daboosha faashad aan biyaha soo maraynin marka aad qubaysanaysid. Ha taabanin goobta la tallaalay ka-dibna ha taabanin qeyb kale ee jirkaaga ah marka hore adiga oo gacmahaaga aan dhaqin. **Ha taabanin indhahaaga ama qeyb kasta oo jirkaaga ka tirsan ka-dib bedellaada faashada ama taabashada goobta la tallaalay.**

Waxa aad si taxadar dheerad ah u labisataa shaar daboolayo goobta la tallaaalay, gaar ahaan xaaladaha xiriirka dhakhtarka aadka kugu dhow (si kale, waalidka caruurta yar-yar).

Faashada la isticmaalay waxa aad ku ridaa bac caag ah oo xarig leh ka hor inta aadan dibada u tuurin. Sidaas si la eg u sameey nabarka xinjirta leh marka uu soo hoobto. Ha wadaagina shukumaanada. Dhaq alaabada taabatay goobata la tallaalay. Gacmahaaga dhaq ka-dib taabashada goobta la tallaalay ama faashada, dharka, go'a sariirta ama shukumaanada taabtay goobta la tallaalay.

Goobta la tallaalay waa in la eega ilaa 7 maalmood ka-dib marka la tallaalay si loo hubiyi in tallaalka uu shaqeynayo.

6 Dadka qaarkooda ma helayaan tallaalka cudurka furuqa ama waa in ay sugaan

Waxa ka aad eegtaa Dheeriga C iyo D waxii warbixin dheeraad ah

Isticmaalka Nidaamka xaalad aan-deg-deg ahayn (ma jiro cudur faafin)

- Qof kasta uu qaba cambaar ama toxobka korreeya ee maqaarka, ama taariikh hore u qabay labada xaaladoodba, ma helayo tallaalka cudurka furuqa.
- Qof kasta oo la xiriira **xaaladda *maqaarka taa soo sababayso in maqaarka uu dil-dilaaco*** (sida nabaro yar-yar oo jirka ka soobaxa marka jirka wax qoonsado, gubasho daran, impetigo, bus-buska, nabar adag, ama finan xanuun daran) waa in uu sugaa ilaa xaaladda ay ka caddaanayso ka hor helitaanka tallaalka cudurka furuqa.
- Qof kasta oo nidaamka difaaca jirka ay daciif yihiin ma helayo tallaalka cudurka furuqa, waxaa ku jiraan qofka:
  - HIV/AIDS ama cudur kale kaa soo waxyeeleeyo unugyada difaaca jirka.
  - Si macquul ah uga baa-ba'ayaan nidaamka difaaca jirka ee ka yimaada cudur xanuun daran, sida lupus erythematosus oo nidaamsan.
  - Laga daaweynayo, ama dhowaan lagu daaweeyey, daawooyinka wax-yeeleya nidaamka difaaca jirka, sida steroids, daawooyinka qaarkooda ee cudurla la tallaalo, ama daawooyinka laga qaado ururka isku tallaala xubin jirka ama dhuuxa lafaha.
  - Qaba leukemia, lymphoma, ama badanaaba cudurka kansarada kale.
  - Qaadanayo daawooyinka cudurka kansarka ee la xiriira raajooyinka ama daawooyinka, ama uu qaadanayo daawo 3dii bilood ee la soo dhaafay.
- Ruuxa dumarka ah ee uurka leh ma helayo tallaalka cudurka furuqa.
- Haweenka waa in ay iska ilaaliyaan uur muddo 4 isbuuc ka-dib marka ay qaataan tallaalka cudurka furuqa.

Shakhsiyaadka la nool ama ay la leeyihiin xiriirka jirka ee aad isu-dhow qof ku dhacay mid kasta oo qeybaha kor lagu soo sheegay ma helayo tallaalka cudurka furuqa, sababta oo ah dhibaato oo ka soo helay xiriirka dhowaanshaha ah. (Xiriirka dhowaanshaha waxaa ku jiraan qof kasta oo ku nool gurigaaga iyo qof kasta aad la leedahay xiriirka jirka, sida wadaaga isu-taga. Ma ku jiraan asxaabta ama dadka aad la shaqeysid.)

Tallaalka cudurka furuqa looguma tallinayo qof kasta oo ka da' yar 18 sanadood.

- Ma helaysid tallaalka cudurka furuqa haddii weligaa noloshaada-khatar ugu jirtay fal-celinta daawooyinka jirka qoonsado ee **polymxin B, streptomycin, chlortetracycline, neomycin, ama qaadashada goor dhow daawada tallaalka cudurka furuqa.**
- Hooyooyinka naaska nuujiya caruurta ma helayaan tallaalka cudurka furuqa.
- Shakhsiyaadka isticmaala daawoyinka indhaha lagu dhibciyo ma helayaan tallaalka cudurka furuqa.
- Dadka meel-dhexaadka ama aadka u xanuunsan waqtiga loo qabtay tallaalka badanaaba way sugayaan ilaa ay raysanayaan ka hor inta ayna qaadanin tallaalka cudurka furuqa.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xaalad kasta oo kor lagu faah-faahiyey, la tasho bixiyahaaga daryeelka caafimaadka helitaanka tallaalka cudurka furuqa ka hor

Isticmaalka Xaaladda Deg-dega (Marka uu dilaaco Cudurka Furuqa)

- Arimahan la xadiday laguma dabaqi karo waqtiga cudurka furuqa uu dilaaco.

7 Waa Maxay dhibaatooyinka ka imaanaya tallaalka cudurka furuqa?

Waxa ka aad eegtaa Dheeriga A waxii warbixin dheeraad ah

Warbixinta soo socota waxay ku sabsan tahay waxa la yaqaano ee ficil-celinta tallaalka cudurka furuqa. Tallaalka, sida daawo kasta, ayaa dhibaatooyin halis sababi kartaa, waxaa ku jiraan kuwa aan anagu garanaynin waxa ku saabsan, sidoo kale ficil-celinta wax jirka qoonsada ee aadka u daran. Dhibaatada tallaalka cudurka furuqa waxay keenaysaa dhib halis ah, ama dhimasho, aad buu u yar-yahay.

Dhibaatooyinka Meel-dhexaadka ee Dabacsan

- Nabaro yar-yar oo jirka ka soo yaaca oo dabacsan, waxay dhamaanayaan 2-4 maalmood.
- Qandho ka saraysa 100F (ilaa 10% ee qofka weyn).
- Nabaro biyo galaan ee ku dhaca meelo kale ee jirka (ilaa 1qof 1,900kiiba).

Ilaa saddex meel-hal meel oo dadka hela tallaalka waxaa laga yaaba in ay dareemaan xanuun ku filan oo aan ku aadi karayn shaqada ama dusiga ama hawlaha raaxaysiga, ama in si ku-meel gaar ah lala kulmo dhibaato hurdo la'aan.

Sii socda...

Dhibaatooyinka aadka u daran ee Meel-dhexxad ah (Kaa soo u Baahan Feejignaan Caafimaad oo Deg-deg ah)

- Cudurka indhaha oo laga qaado faafinta feyruuska tallaalka oo ku faafo indhaha kaa soo u horseedayo in indhaha aragooda lumiyaan.
- Nabaro yar-yar oo ku fida jirka oo dhan (sida ugu badan 1 qof ee 4,000), ee badanaaba lagu xaliyo dhibaato la'aan.

Dhibaatooyinka Halista-ee Ku Imaan Karta Nolosha

- Nabaro daran oo ka soo baxa jirka dadka qaba cambaarta ama (sida ugu badan 1 qof ee 26,000), kaa soo u horseedi kara nabaro xagtin leh ama dhimasho.
- Cudurka Encephalities (ficil-celin xanuun daran ku yimaada maskaxda) (sida ugu badan 1 qof ee 83,000, badanaaba dadka nidaamka difaaca jirkooda uu daciif yahay), kaa soo u horseedi kara nabaro xagtin leh ama dhimasho.
- Cudurka jeermiska faa-fiya ee xanuunka daran horumarkiisna ka bilawda goobta la tallaalay (sida ugu badan 1 qof ee 667,000, badanaaba dadka nidaamka difaaca jirkooda uu daciif yahay), kaa soo u horseedi karo nabaro xagtin leh ama dhimasho.

Halkii miliyan kastaba oo dadkii hore loo soo tallaalay, inta u dhaxaysa 14 iyo 52 waxay qabeen ficil-celinta halista-nolosha ee tallaalka cudurka furuqa iyo 1-2 oo dhintay.

Dadka ku yimaada xiriir aan toos ahayn goobta la tallaalka ee qof la tallaalay, ama alaabada taabatay goobta la tallaalay, waxay weli lahaan kartaa ficil-celin haddii ay ayaga noqdaan kuwa qaada feyruuska tallaalka.

8 Waa maxay haddii uu jiro wax meel-dhexaad ah ama ficil-celin daran?

Waxa ka aad eegtaa Dheeriga A iyo B waxii warbixin dheeraad ah

Raad-raadin:

- Goobta la tallaalay oo ay u eg-tahay in si caadi ah u bogsanin, nabaro yar-yar oo jirka ka soo yaaca ama xanuun ka jira qeybaha kale ee jirka, cudurka ku dhaca indhaha, madax xanuun joogta ah ama qandho, wareer, qallal, hurdo ka toosida oo dhib ku ah, ama dhibaato kale oo aan la filanaynin. Calaamooyinka ficil-celinta waxa jirka qoonsado oo halis ah waxaa ku jiri karaa neefsashada oo dhib ah, habeeb ama neef-tuurid, rugta shinnida, midabka wejiga oo is-bedella, daciifnimo, wadnaha oo si dhaqso ah u garaacayo ama dawakh oo ku yimaado daqiiqado yar gudahooda ilaa saacado yar ka-dib tallaalka.

Haddii adiga, ama xiriir dhow ee jirka, barshada mid kasta oo xaaladahan ah, ama haddii adiga aad ka wal-walaysid wax kasta oo ku saabsan ee xaaladan ee aad la kulantay tallaalka ka-dib:

- Waxa aad wacda bixiyaha daryeelka caafimaadka, ama waxa aad si toos u hesha qofka qaabilsan daryeelka caafimaadka.
- Waxa aad u sheegta bixiyaha daryeelka caafimaadka in laga soo tallaalay cudurka furuqa iyo goorta.
- Waxa aad weydiisa dhakhtarkaaga ama kal-kaaliye in uu fayl-gareeyo Warbixinta Go'aanka Natiijada Tallaalka (foomka VAERS) iyo la xiriir waaxdooda caafimaadka. Waxa kale oo fayl-garayn karta Wargelinta nafsadaasa adiga oo booqanaya weebsaayitka VAERS ee http://www.vaers.org ama adiga oo Wacaya 1-800-822-7967.

Daaweynta Ficil-Celinta Halista ah

- Tallaalka lagu magacaabo Vaccinia Immune Globulin (VIG) wuxuu caawin kara dadka qaba dhibaatooyin qaarkooda oo halista ah ee tallaalka cudurka furuqa. Daawada labaad, cidofovir, waxa dhaci karta in loo isticmaalay xaaladaha qaarkooda. Midkoodna daawada haadan ee rukhsada leh ee loo sameeyey ujeeddadan, waxayna waxyeelayn kara ayaga.

Qiimaha Daaweynta Ficil-celinta Tallaalka

- Daaweynta ficil-celinta daran waxay noqon karta mid aad u qaali ah. Magta shaqaalaha ama caymiska caafimaadka ma dabooli karaan kharashyadan.

- Ma jiraan barnaamij dowladda dhexe oo dib kuu soo celinayo waqtiga shaqada kaaga lumay, sababta midkooda oo ah jiro ku timaada tallaalka ama wal-wal ku saabsan feyruuska oo ku faafa kuwa kale. Hay'adda aad u shaqeysid ayaa kuu sheegi karta haddii ayaga, ama magta shaqaalaha, ay dabooli doonto Kharashyadan.

9 Sidee aan u baran kara wax dheeraad ah?

- Akhri dheeraadka VIS.
- Weydii dhakhtarkaaga ama kal-kaaliyaha, Waxa ayaga ku tusin karaan baakada tallaalka meesha la geliyo ama u soo-jeedin ilo kale ee warbixin ah.
- Wac waaxda caafimaadka gobolkaaha ama tan gudaha ee aad degan tahay.
- La xiriir Xarumaha Laga Ilaaliyo Cudurka iyo Looga Hortago (Centers for Disease Control and Prevention (CDC):
  - Wac **1-888-246-2675** (luqada Ingriisiga)
  - Wac **1-888-246-2857** (luqada Isbaanishka)
  - Wac **1-866-874-2646** (dadka dhegaha culus – TTY)
  - Waxa aad booqata weebsaayitkayna cudurka furuqa http://www.cdc.gov/smallpox/

U.S. Department of Health & Human Services
Xarumaha la Dagaalanka iyo Ka Hortaga Cudurka Baranaamijka Tallaalka Qaranka

Smallpox (1/16/03) Vaccine Information Statement